REFUGEE HEALTH
NETWORK QUEENSLAND

Somali

QIIMEYNTA CAAFIMADKA MARKA AAD SOO GASHO AUSTRALIA

Loogu talagalay soogalootiga bani'aadamnimada

Wax yar ka dib markaad timaad Australia, waxaa laguu qaban doonaa ballan dhakhtar (oo loo yaqaan "GP") iyo kalkaaliso si loo sameeyo qiimeyn caafimaad.

Xitaa haddii aadan xanuunsanayn, waxaa muhiim ah adiga iyo carruurtaada inaad ka soo qayb gashaan ballamahan Qiimaynta Caafimaadka si loo xaqiijiyo caafimaadkaaga, aad u hesho warqadaha daawada iyo daaweyn haddii aad u baahan tahay. Takhtarkaaga guud ayaa sidoo kale go'aamin doona haddii aad u baahan tahay inaad aragtid Takhasusle oo qorsheyn doona in lagu gudbiyo. Ballantani maaha mid khasab ah laakiin waa lagugula talinayaa inaad tagto.

Horey baa caafimaadkayga loosoo baadhay markaan fiisaha qaadanayay, markaa maxaan ugu baahanahay qiimayn caafimaad?

Baaritaankii hore ee caafimaadka wuxuu la xiriiray fiisaha aad codsatay mana ahayn hubin caafimaadka iyo fayoobi guud.

Qiimaynta caafimaadka waxa qeyb ka ah baadhitaano kala duwan si loo eego caafimaadkaaga oo lagugu xidho adeegyada kale ee caafimaadka ama barnaamijyada baadhista caafimaadka ee lagu taliyay (sida dhakhtarka ilkaha ama dhakhtarka indhaha). Qiimaynta caafimaadku waxay kugu xidhaysaa GP-ga oo aad markasta arki karto si aad u hesho daryeel joogto ah.

Waa maxay qiimaynta caafimaad?

Qiimaynta caafimaadka waxaa loogu talagalay qof kasta oo yimaada Australia, oo ay ku jiraan carruurta. Waxay **qaadan kartaa ilaa hal saac ama ka badan waxaana laga yaabaa inaad u baahato wax ka badan hal ballan**. Waxa qeyb ka ahaan kara waxyaabaha soo socda:

- Su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga
- Baaritaanka jirka
- Uruurinta dhiiga, kaadida iyo saxarada
- Tallaalada.

Kalkaaliso iyo/ama GP-ga ayaa laga yaabaa in ay ku weydiiyaan in ay jiraan marxalado hore oo saameyn ku leh sida aad dareemayso iyo sida aad ula qabsanayso nolosha Australia. Waxaa jira adeegyo gaar ah oo kaa caawin kara walaacan.

Waxaad xaq u leedahay inaad waydiiso su'aalo ku saabsan baaritaan kasta, jirro iyo daaweyn kasta oo lagu siinayo.

Maxaan ugu baahanahay tallaalo?

- Waa habka ugu wanaagsan uguna nabdoon ee aad uga taxadari karto naftaada, carruurtaada iyo bulshada oo dhan.
- Si aad iskaga diiwaan geliso dugsiga iyo xannaanada carruurta waxa fiican in ubadkaagu si buuxda u talaalan yahay.
- Si aad u hesho qaar ka mid ah lacagaha Centrelink dhammaan carruurtaadu waxay u baahan yihiin in si buuxda loo tallaalo.

Waa inaad hubisaa in dhammaan carruurtaadu ku dhameystaan tallaalkooda muddada la cayimay. Kalkaalisada rugta caafimaadka ayaa kuu sheegi doonta goorta aad leedahay ballamaha. Haddii

ilmahaagu dhammeeysto tallaalkooda, Centrelink waxa laga yaabaa inay u baahdaan warqad GP ga ka socota oo taas caddeynaysa si lacagtaadu u sii socoto.

Waxa aan hore u qaatay tallaalada qaar marka maxaan ugu baahanahay in aan mar kale qaato?

Waxaa jira qaar ka mid ah tallaalada lagu bixiyo Australia oo laga yaabo in adiga ama ilmahaaga aan horay loo siin.

Haddii aad keeni karto diiwaanka tallaalada ee adiga iyo ilmahaaga ah isla markaasna la fasiray, kuwaas wuxuu GP-gaaga galin karaa Diiwaanka Talaalka Australia waxaana laga yaabaa inaan loo baahnayn in lagu celiyo. Diiwaanadaada lacag la'aan ayaa laguugu fasiri karaa. Waxay qaadan kartaa ilaa 30 maalmood https://translating.homeaffairs.gov.au/en/about-this-service/

Haddii aadan haysan diiwaanka tallaaladii hore waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad mar kale qaadato. Taasi wax dhib ah kama imaanayaan oo kalkaalisadaada ama GP-gaaga ayaa kaala hadli kara taas marka aad tagto ballantaada.

Maxaan hore usoo qaataa marka aan leeyahay balamahayga caafimaad (haddii aad leedahay balan)?

- Kaarka Medicare ka ama lambarka Medicare ka
- Diiwaanada tallaalka iyo macluumaadka ku saabsan taariikhdaada caafimaad
- Kaarka Daryeelka Caafimaadka Australia (Australian Health Care Card)

Maxaa dhacaya ballanta qiimaynta caafimaadka ka dib?

Kalkaalisada ama GP-ga ayaa laga yaabaa inay ku weydiiyaan inaad soo noqoto marka natiijadu diyaar noqoto. Sidaas waxaa loo sameynayaa si daawayn ama gudbin laguugu qorsheeyo.

Lacag miyaan bixinaya si aan u helo qiimayn caafimaad?

Maya, qiimayntan caafimaad waa lacag la'aan.

Laakin haddii laguu gudbiyo baaritaanno dheeraad ah sida raajada ama si aad u aragto Takhasusle, ballamahaan waxaa laga yaabaa inaysan si buuxda u daboolin Medicare oo waxaa laga yaabaa inaad bixiso lacag. Weydii GP-gaaga oo ka hubi adeega haddii ay "bulk bill" sameeyaan (tani waxay la macno tahay wax kharash ah inaan lagaa rabin adiga).

Caafimaadkaygu ma saamayn doonaa fiisahayga?

Maya.

Dhammaan macluumaadka iyo natiijooyinka hubinta caafimaadka waa kuwo kuu sir ah adiga lamana siin doono dadka aan ku lug lahayn daryeelkaaga caafimaad ayadoon fasax lagaa heysan. Shaqaalaha caafimaadka looma ogola inay cidna kala hadlaan dhibaatooyinkaaga caafimaad, marka laga reebo shaqaalaha kale ee daryeelka caafimaadka ee ku lug leh daryeelkaaga. Xogtu ma saamayn doonto sharciga deganaanshahaaga Australia.

Maxaan samayn karaa haddii aanan ku hadlin ama fahmin Ingiriiska?



Haddii Ingiriisku aanu ahayn luqadaada koowaad, turjubaan ayaa kaa caawin kara inaad la hadasho oo aad fahamto shaqaalaha daryeelka caafimaadka. Fadlan ka codso adeega caafimaadka inay kuu qabtaan turjubaan ama **Adeegga Turjubaanka Taleefanka (Telephone Interpreter Service - TIS)** kawac **131 450.** GP-gaagu inuu isticmaalo Adeegga Turjubaanka waa u lacag la'aan.

Macluumaadka Caafimaadka ee la fasiray www.healthtranslations.vic.gov.au